



**City of Seattle**

# Sweetened Beverage Tax

Taageerida cunto caafimaad leh iyo kobaca iyo caafimaadka caruurta

Lagasoo bilaabo 2018, Seattle waxay billoowday inay canshuur ka qaado cabitaanada sonkorta leh ee laga bixiyu gudaha magaalada (**Xeerka 125324**). Sweetened Beverage Tax (SBT, Canshuurta laga qaado Cabitaanka Sonkorta leh) maaha canshuurtaa iibka ee tooska looga jaro macaamiisha. Taas badalkeeda, canshuurtaan (oo dhan 1.75 senti halkii ounce-ba) waxaa laga jarayaa dadka iibbiya wax soosaarka waxyabaha sonkorta leh ee ay ku iibiyaa Magaalada Seattle gudaheeda.

## Maxay magaalada Seattle canshuurtaan usoo rogtay?

Canshuurta waxaa loogu talagalay in kor loogu qaado caafimaadka dadka reer Seattle ayadoo la yaraynaayo iibabka iyo isticmaalida cabitaanada sonkoraysan. Intaa waxaa dheer, dakhliga kasoo xarooda canshuurta waxaa ugu horreyn loogu isticmaalaa si loogu taageero helitaanka cunto caafimaad leh, koboca caruurta, iyo barnaamijyada waxbarashada dhallaanka. Daraasad ayaa muujinaya in cabitaanada sonkorta leh ay keeni karaan cayil muddo fog jira, taasoo kor uqaadi karta halis ah in ay dadka ku dhacaan **nooca 2-aad ee sonkorowga, dhiig karka**, iyo xanuunka wadnaha. Cabitaanada sonkorta leh waxay sidoo kale keenaan bololka ilkaha. Dhalada ay kujiraan 20-ounce oo soodhada ah waxaa kujiri kara wax kabadan 15 qaado oo sonkor lagu daray iyo in kabadan 250 kaloriyo ah oo aan lahayn nafaqo fiican.

### CABITAANADA LA CANSHUURAAYO



Soodhada Caadiga ah

Cabitaanada Miraha laga sameeyay

Cabitaanada tamarta iyo kuwa isboortiga



Biyaha la macaaneeyey



Qaxwaha iyo Shaaha Sonkorta leh



Sharooboyinka iyo qasqasyada

### CABITAANADA LAGA DHAAFAY CANSHUURTA



Caanaha oo ay kujiraan kuwa dhirta laga keenay

Cabitaanada sonkorta yarta ah leh

Cabitaanada shildan 100%



Biyaha Dhalada kujira



Cuntooyinka ilmaha



Cabitaanada khamriga

20 OZ OO SOODHO AH waxaa kujira

15



oo qaado shaaha ah

oo sonkor lagu daray ah iyo

250

kalooriyo aan nafaqo lahayn



KALIYA 1-2 QASAC

oo ah soodho maalintiiba

WAXAY KOR UQAADAYSAA HALISTA sonkorowga nooca 2 aad

26%

Lagu daray kuwa budada iyo qasqasyada ay qastaan maacaamiishaa cabaa, iyo cabitaanada loo adeegsado arrimaha caafimaadka.

## Xagee lagaynayaa lacagta?

Waxaa kor kala socda **Sweetened Beverage Tax Community Advisory Board (Guddiga La-talinta Bulshada ee Canshuurta laga qaado cabitaanka Sonkorta leh)**, dakhliga waxaa loo adeegsadaa in lagu taageero barnaamijyada kordhinaya helitaanka cunto caafimaad leh iyo kor uqaadida caafimaadka caruurta, kobcinta, iyo udiyaar garoowga dugsiga. Macluumaad faahfaahsan, eeg **Seattle Municipal Code 5.53.055 (Xeerka Degmada Seattle 5.53.055)**.

### Helitaanka Cuntada

61%

#### Kordhinta helitaanka loo siman yahay ee cuntada nafaqada leh iyo cabitaanada

Dakhliga kasoo xarooda SBT wuxuu taageeraa bangiyada cuntada, barnaamijyada cuntada iyo adeegyada cunto gaarsiinta ee qoysaska, dadka da'da ah, iyo shakhsiyadka wajahaya cunto yarida. Maalgalintu waxa ay sidoo kale gaartaa barnaamijyada bixiya miraha iyo khudaarta cusub, dhaqan ahaan habboon, oona kabaxay deegaanka kuwaas oo siiya dhallinyarada kujirta xarumaha bulshada, daryeelka ilmaha, xanaanada caruurta ee dugsiga kahor, iyo dugsiyadaba. **Fresh Bucks (Kabista libsiga Cunto Dheeraad ah)**, waa barnaamij ka caawiya dadka reer Seattle oo haysta miisaaniyad yar inay awoodaan soo libsiga cunto caafimaad leh, ayaa ay sidoo kale taageertaa canshuurta.



#### Horumarinta caafimaadka iyadoo loo marayo mashruucyo ay hoggaamineyo bulshada

Dadaalada badankooda oo ay maalgaisay dakhliga kasoo xarooda SBT waxaa hoggaamiya dadka ay sida aadka ah u saamaysay sinnaan la'aanta cuntada iyo caafimaadka: Dadka Madowga ah, Dadka Asalka ah, Dadka Aan Caddaanka Ahayn, soo galootiga, qaxootiga, dadka dhaqaalhoodu hooseeyo, dhalinyarada iyo waayeelka. Dadaaladaan waxaa kamid ah barnaamijka deeqda bulshada ee **Food Equity Fund (Sanduuqa maalgalinta Sinaanta Cuntada)** oo ah **ol-ole warbaahineed oo dhalinyaradu hoggaaminayaan** si loo horumariyo cabitaanka biyaha, iyo ku rakibidda xarumaha buuxinta dhallooyinka ee kuyaala Dugsiyada Dadwaynaha ee Seattle, iyo xeeladaha kala duwan oo kor u qaadaya helitaanka cunto iyo cabitaano caafimaad leh, oo dhaqan ahaan habboon.



### Caafimaadka Caruurta iyo

### Waxbarashada Dhallaanka

39%

#### Kordhinta helitaanka loo siman yahay ee daryeelka caruurta oo tayo sare leh

Dakhliga kasoo xarooda SBT waxa uu ballaarinayaay **barnaamijka kabitaanka ka almada daryeelka caruurta** ee loogu talagalay qoysaska shaqeeya, taageeridda bixiyayaasha **Family Child Care (Barnaamijka Daryeelka Caruurta ee Qoyska)** ee yar iyadoo loo marayo boooqashada guryaha, qaybaha tababarka, iyo kaawinta farsamooyinka, iyo siinta latalin caafimaad iyo tababarka si ay u caawiyaan kor uqaadida tayada daryeelka ilmaha iyo dhalaanka.



#### Maalgalinta caafimaadka iyo horumarka caruurta

Sanadkii 2021, Magaalada Seattle waxa ay billioowday barnaamijkeedi abid ugu horreeyey ee **Prenatal-to-Three Community Grants Program (Barnaamijka Deeqda Bulshada ee Loogu Talagalay Hooyooinka Uurka Leh ilaa ilmuhi Kagaaraan Saddex Sano)** oo leh dakhliga SBT. Dakhligu waxa uu sidoo kale taageeraa barnaamijyada bixiya baaritaanada kobaca iyo taageerada daaweynta, sida barnaamijka Developmental Bridge (Buundada Horumarka) ee loogu talagalay ilmaha leh dhibaatooyinka kobaca ama xubin qoyska ah oo qaba naafonimo.



Sanadkii 2021 Sweetened Beverage Tax waxa ay bixisay

**\$20.3M**

ee loogu talagalay barnaamijyada iyo adeegyada kordhinaya helitaanka cunto iyo cabitaan caafimaad leh oona taageeraya kobaca iyo waxbarashada hore ee dhallaanka.

